NORRTÄLJE KOMMUN

# Dugsiga xannaanadda

Maamulka dowladda hoose waa in dhammaan ilmaha da`dooda 1 sano ka wayn, oo ku nool dalka Iswiidan oona weli iskuul aan bilaabin, waa in u siiyaa fursadda dugsiga xannaanadda. Kuwa dugsiyada xannaanadda maareeya waxaa loo yaqaanno [huvudman]. Waxaa jiraan dugsiyada xannaanadda Dowladda hoose Norrtälje maareyso iyo dugsiyada xannaanadda ee madaxbannaan. Dugsiga xannaanadda ee madaxbannaan waa Dugsiga xannaanadda oo Maamulka dowladda hoose usan maamulin ee waxaa tusaale maamulo shirkad ama urur. Kuwa Dugsiga xannaanadda ee madaxbannaan maamula waxaa loo yaqaanno [enskild huvudman].

Dugsiga xannaanadda waa tallaabada ugu horeeyso ee waxbarashada ubadkaaga waana nooc iskuul oo dhigashadiisa ikhtiyaari ah. Dugsiga xannaanadda waxaa xilsaaran in ilmaha uu gogolxaaro fursadda heerka sare ee waxbarashada muddada dheer qaadan doonto. Dugsiga xannaanadda wuxuu kaalin ka geysta xannaanadda, horumarka iyo guud ahaan waxbarashada. Waxbarashada iyo wax barida waxay badi ahaan ka kooban yihiin ciyaar-carruureed, hal-abuuris iyo sahamin wadajir ilmo kale bareyaasha dugsiga xannaanadda.

Bareyaasha dugsiga xannaanadda, waxay ka soo qalin-jebiyeen kulliyad ama jaamacad, waxaana xilsaaran in hawlgallada dugsiga xannaanadda ay ku salaysan yihiin qorshaha waxbarshada [Lpfö-18.]. Dugsiga xannaanadda waxaa kaloo ka hawlgala bareyaal si kale u tababarsan oona khibrad u leh sare u qaadka horumarka iyo waxbarashada ubadkaaga. Waxay tusaale noqon karaan xannaanadeyaasha ilmaha ama bareyaal kale. Dugsiyada xannaanadda waxay kaloo leeyihiin agaasimaha dugsiyada , kaasoo guud ahaan mas`uul ka ah Dugsiyada xannaanadda.

Gundhigga siyaasadda dugsiyada xannaanadda, waxaa weeyaan in dadka oo idil ay isku heebo yihiin, waxaana hab firfircoon ayaan ugu hawlgalna sidii dhammaan dugsiyadeenna ugu hirgeli lahayn u dhawaansho hal-abuur caadi ah ku salaysan.

## Sharciyada – Dukumeentiga Hagaha u ah

Dhammaan dugsiyada xannaanadda, kuwa Dowladda hoose ay maamusho iyo kuwa madaxbannaan ba, waxaa lagu haga qodobada sharciga iskuullada iyo qorshaha waxbarshada ee Dugsiyada xannaanadda, [Lpfö-18]. Qorsheha waxbarshada warbixin dheeraad ayaa ka aqrisan kartaa, oo ku saabsan sida dugsiyada xannaanadda u hawlgalaan iyo nooca waxbarashada iyo wax barida

aad ka filan karto in ubadkaaga u dugsiyada xannaanadda ka helo. Tan iyo 1 jannayo 2020 waxaa qodobada Baaqa carruurta lagu biiriyey sharciyada dalka Iswiidan iyo qodobada lagu hago dhaqdhaqaaqa dugsiyada xannaanadda.

- Qorsheha waxbarshada (Lpfö 18) ee Dugsiyada xannaanadda – Skolverket norrtalje.se/lpfo18
- Baaqa carruurta - UNICEF dalka Iswiidan norrtalje.se/barnkonventionen

## Filashada dugsiyadaha xannaanadda

Markii ubadkaaga u dugsiga xannaanadda bilaabo, waxaad ka filan kartaa in xannaanad, horumarka iyo waxbarashada ay midaysan yihiin. Dugsiyada xannaanadda waa in laga helo bay`adda waxbarashada oo heer sare ah, taasoo kaalin ka geysan doonto rabitaanka wadareed iyo sahamin-waxbarashadeed. Hawlgallada wax barida ku salaysan waa in gundhigooda ay yihiin tixgelinta aadamiga iyo dimuqraadiyadda waana tallaabada ugu horeeyso ee waxbarashada ubadkaaga. Dugsiyada xannaanadda ee degmada Norrtälje waa in dhammaan ilmaha iyo xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta si wanaagsan loogu soo dhoweeya oo ku salaysan ka qaybgelis iyo saamayn ku yeelasho. Dugsiyada xannaanadda waxaa ka hawlgalaan bareyaasha dugsiyada xannaanadda oo tababarsan iyo xannaanadeyaasha ilmaha iyo agaasimeyaasha dugsiyada. Waxaad kaloo halkaan kula kulmi kartaa kooxo xirfadeed kale sida kaaliyeha agaasimaha dugsiyada, ku simeyaal, arday, shaqaalaha jikada iyo nadaafadda. Dhammaan dadka ka hawlgala dugsiyada xannaanadda waxay tixgeliyaan sirta xirfadda.

Maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalidka waxaad filan kartaa in bareyaasha ay si toos ah xiriir kula yeelan doonaan oona kaaga sheekayn doonaan dhacdada agagaarka ubadkaaga.

## Waxyaalaha adiga oo ah xilhaayeha xannaanadda/waalidka laga filanayo

Markii ubadkaaga u bilaabo dugsiga xannaanadda waxaan ka filanaynaa inaad wixii warbixin ah aad aqrisato, oona tixgeliso nidaamyada iyo hab-dhaqamada joogtada ah. Waxaan ka filanaynaa in adiga iyo anaga ba, aan mar kasta xoog saarno waxa ilmaha maslaxad ugu jirto iyo in wadashaqaynta dabcan aynan meesha ka maqnayn. Waxaan rabna in adiga oo ah xilhaayeha xannaanadda/waalidka nala wadashaqeeyso, adigoo maamulka dugsiga xannaanadda wargeliyo haddii ay jirto arrin u baahan in aan aqoon u yeelano, taasoo ku saabsan ubadkaaga ama haddii ay jirto arrin aad is-waydiinayso ama su`aallo ka qabto. Sidii dhammaan ilmaha loo siiyo fursad ay wax ku bartaan,

ciyaar-carruureeda iyo horumar wadajir saaxiibadooda, waxaan filanaynaa in ubadkaaga u caafimaad qabo oona kari karo in ka qaybgalo wax barida iyo dhaqdhaqaaqyada dugsiga xannaanadda laga helo. Waxaan kaloo ka filanaynaa in adiga aad daahid la`aan na wargeliso haddii ubadkaaga jirro ama fasax dartiisa aadan dugsiga keeni doonin. Haddii bareha u sabab darteed sida tusaale u ubadkaaga dugsiga ku xannuunsado, u kula soo xiriiro maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalidka, waxaan filanaynaa inaad sida ugu dhaqsida badan aad ubadkaaga dugsiga ka kaxayso.

## Gogoldhig

Muddada ugu horeeyso ee dugsiga xannaanadda waa muddada gogoldhigga oo ubadkaaga iyo adiga ba muhim idin ah. Taasoo macneheedu ay tahay in ay tahay fursad cajiib ah oo aad ku baran doonto sida noolol-maalmeedka ubadkaaga u noqon doono. Muddadaas waxaad heli doontaa aqoon ku saabsan qaabka dugsiyada xannaanadda looga hawlgalo, bareyaasha waxay doonayaan inaad ugu sheekeyso baahida, waxyaalaha u xiiseeyo iyo khibradda ubadkaaga. Xaaladdaas waxay bareyaasha heli doonaan, fursad heer sare ah oo u ku qorsheeyaan kuna abaabulaan wax barida, sidaas ayuu ubadkaaga ku heli doonaa fursado heer sare ah ee ciyaar-carruureed iyo waxbarasho ba.

Dugsiyada xannaanadda siyaabo kala duwan ayay gogoldhigga u qorsheeyaan, laakiin waxay dhammaantooda ka midaysan yihiin in cunug kasta u yahay ilmo gaar ah, oona wakhtiga ugu horeeyo u noqdo mid dabacsan oona gaar ahaan loola qabsiiyo ubadkaaga. Ku talagal in gogoldhigga u qiyaastii qaadan doono laba toddobaad, laakiin xitaa in ka badan ama ka gaaban ayuu qaadan karaa. Markii ubadkaaga boos xannaanadda looga soo bandhigo, waa in labada xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ay 8 maalmood gudahooda ka soo jawaabaan fursadda ubadkooda la siiyay. Kaddib maamulka dugsiga xannaanadda wuxuu wadajir idinka qorshayn doonaa muddada gogoldhigga.

## Waxaad hoosta ka saxiixi doontaan wixii dokumentiyo ah

Markii ubadkaaga uu dugsiga xannaanadda bilaabi doono, waxaa muhim ah in adiga aad buuxiso dokumentiyo/foomam kaddib hoos ka saxiixdo. Waa kuwa muhim ah maadaama adiga aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalidka inaad buuxiso, sidii bareyaasha ay ku helaan aqoon sidii lagula soo xiriiri lahaa, haddii ubadkaaga u wax ku dhaco ama u baahi gaar leeyahay sida tusaale raashin nooc gaar ah, daawooyin iwm. Waxaa kaloo muhim in adiga oo ah xilhaayeha xannaanadda/waalidka aad saamayn ku yeelato kana qaybgasho waxyaalaha la soo bandhigi doono ee ubadkaaga khuseeyo.

## Sahamin - warbixin

Dhammaan dugsiyada xannaanadda ee dalka Iswiidan, waxay hadba sida waafaqsan qorshaha waxbarshada, Lpfö-18, ee dugsiyada xannaanadda, waajib ku ah in si joogto ah oo hab-dhis leh tixraacaan, soo bandhigaan iyo falanqeeyaan horumarka iyo waxbarashada cunug kasta. Sababta waxay tahay in bareyaasha ay helaan qaab ay ku horumaritaan tayada dugsiyada xannaanadda, si hagaajiyaan wax barida iyo sida ugu fiican ay ugu hawlgeli lahaayeen in dhammaan ilmaha horumar sameeyaan waxna bartaan.

Dugsiyada xannaanadda ee Dowladda hoose Norrtälje maamusho iyo dhawr dugsiyada xannaanadda madaxbannaan waxay isticmaalaan farsamada digitalka madasha waxbarashada warbixin, isgaar-siin iyo bandhigid dartood. Waxaa madasha laga hela fursadda ka qaybgelis iyo saamayn ku yeelasho waxbarashada ubadkaaga la siiyo. Dugsiyada xannaanadda ee madaxbannaan kale siyaabo kale ayay qoraallada xog-waran iyo warbixin u soo bandhigaan.

## Wadahadal - wadashaqaynta ka dhaxayso qoysaska iyo dugsiyada xannaanadda

Markii ubadkaaga u bilaabo dugsiga xannaanadda waa muhim in bareyaasha ay helaan aqoon ku saabsan baahida, xiisooyinka iyo khibradda ubadkaaga. Maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalididka waxaad xilliga gogoldhigga ama wadahadalka bareyaasha ugu sheekayn kartaa waxyaalahaas iyo baahida ubadkaaga u gaarka ah. Sannadka kasta waxay maamullada dugsiyada xannaanadda, waalidiinta siiyaan fursad wadahadal oo ka warbixiyaan ka helista, horumarka iyo waxbarashada ubadkooda. Wadahadalka noocaan waxaa loo yaqaanno wadahadalka ka arrinsashada horumarka waxbarashada ee ardayga [Utvecklingssamtal] waana hab lagu dhaqan geliyo wadashaqayn, ka qaybgelis iyo ka warqabid xaaladda u cunugga kaga sugan yahay dugsiga xannaanadda. Markii wadahadalka la yeelanayo waxaa adiga iyo bareyaasha xog saaraysaan sidii maamulka dugsiga xannaanadda u hab heer sare wax ugu qaban lahaa horumarka, xiisooyinka iyo baahida ubadkaaga. Xiriirka ugu muhimsan ee ka dhaxeeya maamulka dugsiga xannaanadda iyo qoyska, waxaa weeyaan kan maalin kasta dhaca oo ku beegan markii ilmaha la keeno lagana kaxeeyo dugsiga xannaanadda n. Goortaas waxaad heleysaa warbixin ku saabsan xaaladdii ubadkaaga u maalintaas kaga sugna dugsiga, waxaa kaloo muhim ah inaad maamulka dugsiga wargeliso, haddii ay jirto arrin u baahan in bareyaasha ay ka warqabaan taasoo ku saabsan ubadkaaga.

## Saacadaha dugsiyada ay furan yihiin

Dugsiyada xannaanadda ee ku yaalaan degmada Norrtälje waa in maalin kasta ay furan yihiin ugu yaraan 12 saacadood. Saacadaha oo badi ahaan ku beegan saacadaha 6.00 - 18.00 ama 6.30- 18.30, isniin-jimce. Waxaa nidaamkaas ka reeban dhammaan sabtiyada/axadaha iyo maalmaha fasaxa sida munaasabadaha [midsommarafton, julafton iyo nyårsafton] oo dugsiyada xannaanadda ay xiran yihiin a.

Dugsiyada xannaanadda ee Dowladda hoose Norrtälje maamusho waxaa xitaa ay fursan yihiin saacadaha aan caadiga ahayn, oo loogu talagalay xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta oo saacadahaas shaqeeya sida saacadaha hore iyo kuwa dambe ee ama maalin ku beegan sabti/axad iwm. Baahida xannaanadda ee saacadaha shaqada oo aan caadiga ahayn waa in ay tahay mid joogto ah xilliga ugu yaraan laba bilood ah. Baahida waa in ay tahay mid si isdabajoog joogto ah iyo ugu yaraan laba jeer bishii, iyo in celcelis ahaan ay ka kooban yahay ugu yaraan lex iyo tobban saacadood bishii.

## Maalmaha albaabada loo xiro

Dugsiyada xannaanadda waxay sannad kasta fursad u haystaan in albaabada loo xiro afar maalmood, kuwaasoo u sabab ah tababarka shaqaalaha, xaalad qiimayn iyo hawlgallada tayada. Dugsiyada xannaanadda waxay kaloo xaq ku leeyihiin in bil kasta hal maalin albaabada u xiran saacado kahor, taasoo u sabab ah kulamada goobta shaqada iyo kulamada kala duwan ee bareyaasha dugsiga. Xilliyadaas waxay bareyaasha ku dhaqaaqan qorshayn, abaabulid iyo qiimaynta wax barida ilmaha. Waxaana u sabab ah in hab taxan sare loo qaado horumarinta dhaqdhaqaaqyada dugsiyada xannaanadda. Agaasimaha dugsiyada ayaa goor dambe idin wargelin doono maalmaha ay noqon doonaan, haddii aynan idin suurtagalayn in ubadkaaga aad fasax u qaadi karto waxaa agaasimaha dugsiga waajib ku ah in ubadkaaga u xannaanad helo. Waa in ugu yaraan 2 toddobaad kahor aad maamulka wargelisa haddii aynan ku suurtagalayn in ubadkaaga aad fasax u qaadi karin.

## Jadwal – goobjoogis - ka maqnaansho

Maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalididka waxaad adeegsan doontaa hab-dhiska jadwalka nalagu wargeliyo iyo goobjoogis - iyo ka maqnaansho ee maamulka dugsiga xannaanadda isticmaalo. Dugsi-xannaaneed kasta waxaa waajib ku ah in adiga oo ah xilhaayeha xannaanadda/waalididka sida jadwal , ka maqnaanshada iyo goobjoogis maamulka loo wargeliyo. Waa

NORRTÄLJE KOMMUN

muhim bareyaasha ogaadaan jadwalka ubadkaaga, sidii qorshaynta iyo abaabulista wax barida iyo xannaanad dhammaan ilmo oo heer sare ah.

Jadwalka ubadkaaga waa in u waafaqsan yahay saacadaha shaqada ama waxbarashada iyo saacadaha socdaallada goobta shaqada. Maalinta aad fasax shaqada ka tahay in xitaa ubadkaaga u fasax ka yahay xannaanadda. Waa inaad daahid la`aan jadwal maamulka wargelisa, sida haddii wax laga beddeli doono Jadwalka waa in lagu dhaqaaqa ugu yaraan hal toddobaad maalinta u hirgeli doono. Haddii cunugga u xannuunsan waa in maamulka aroortii hore la wargeliyo, sidaas ayay bareyaasha ku ogaan karaan tirada maalintaas xannaanadda ku sugnaan doonaan. Maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalididka waa inaad maamulka dugsiga xannaanadda wargeliso hab waafaqsan hab-dhaqmeedka u degsan.

Adiga oo keliya ama qof kale oo magaciisa maamulka dugsiga wargelisay ayaa dugsiga ka kaxayn karo. Taasoo u sabab ah tixgelinta amniga ubadkaaga ee maamulka dugsiga.

## Saacadaha xannaanadda iyo kharashyada

app-ka Edlevo ayaa maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalididka maamulka ku wargelin kartaa saacadaha ubadkaaga u dugsiga ku sugnaan doono. Waa celceliska saacadaha  ee ubadkaaga dugsiga xannaanadda ku sugnaan doono ayuu ku salaysan yahay ee kuma salaysan jadwalkiisa. Maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalidka waxaa ku xilsaaran in adigoo isticmaalayo app-ka Edlevo wax ka beddesho saacadaha ubadkaaga u dugsiga ku sugnaan doono. Laakin fasaxa shaqada ama fasaxyada kale ma noqon karaan sabab aad wax ka beddesho saacadaha ubadkaaga u xannaanadda ku sugnaan doono. Kharashka waxaa gundhig u ah isku-darka daqliyada xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta iyo saacadaha cunugga u ku sugnaan doono xannaanadda. Laga bilaabo xilliga dayrta ee sannadka cunugga u saddex sano buuxsan doono, wuxuu xaq ku leeyahay booska lacag la`aanta ee dugsiga xannaanadda. Waxay kooban tahay 525 saacadood sannadkii waxaan tixraac u ah xilliyada sannad-dugsiyeedka. Xilliga fasaxa iskuullada ku sugnaansho lama oggola. Go`aanka saacadaha waxaa iskaleh agaasimaha dugsiyada iyadoo ku salaynayo maslaxadda dugsiyada xannaanadda iyo ilmaha.

NORRTÄLJE KOMMUN

## Sii wadid

Waa muhim in ubadkaaga u gogoldhigga kaddib hab isdaba joog ah ku sugnaado dugsiga xannaanadda, taasoo u suurtagelin doonto xajinta xiriirka saaxiibadiisa iyo bareyaasha, iyo sidii u ku helo fursadda ka qaybgelista wax barida iskuulka laga helo. Dugsiyada xannaanadda waa nooc iskuul oo dhigashadiisa ikhtiyaari ah, sidaas darteed qoys kasta wuxuu xaq ku leeyahay in ilmihiisa u guriga ku haysto ama fasax la tago. Waa muhim in maamulka dugsiga xannaanadda wargeliso haddii ubadkaaga u fasax yahay. Haddii muddo 1 bil aadan ubadkiinna dugsiga keenin, oona na wargelin wuxuu maamulka ciribtiri doonaa xaq u yeelashada booska xannaanadda. Xaaladdaas wuxuu maamulka xannaanadda idin soo diri doonaa farin, wuxuu na idin siin doonaa muddo laba bilood oo digniin ah. Sida aad u xajisato booska xannaanadda ubadkaaga, waa inaad maammulka qoraal maamulka ku wargelisaa haddii ilaa 3 bilood u ubadkaaga xannaanadda ka maqnaan doono.

## Wargelinta dib u soo celinta booska xannaanadda

Haddii aad ku talo jirto inaad booska xannaanadda ubadkaaga aad dib u soo celiso, waxaad maamulka ku wargelin kartaa oo keliya adigoo isticmaala adeegyada farsamada digitalka ku salaysan [e-tjänsten] ee xilhaayeha xannaanadda/waalidka loogu talagalay ama adigoo la xiriira Xarunta xiriiryada ee Dowladda hoose Norrtälje. Maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalididka haddii aad oggolaato boos ubadkaaga xannaanadda laga siiyay, waa in laba bilood kahor aad maamulka wargeliso inaad booska u baahnayn, iyadoo fiirogaar aan la siin haddii u bilaabay iyo in kale. Laakin waxaad xaq ku leedahay inaad hal toddobaad gudihiisa ka qoomamayso wargelinta dib u soo celinta booska xannaanadda ubadkaaga. Kharashka booska waa in la bixiyo muddada wargelinta dib u soo celinta booska, iyadoo aan tixgelin haddii booska la isticmaalay iyo in kale. Markii taariikhda ay ku beegan tahay 30 juunyo oo cunugga buuxsaday 6 sano, ayaa toos dib looga qaadayaa booskii u xannaanadda ku lahaan jiray.

## Jirro

Sidii ubadkaaga ugu qaybgalo dhaqdhaqaaqyada iyo wax barida iyo ciyaar-carruureedyada wadajir ilmaha kale, waa in u caafimaad qabo markii uu dugsiga ku sugan yahay. Haddaba sidii looga hortago cudurrada iyo faafinta cudur-keeneyaasha awgood, waxaa muhim ah in ubadkaaga u gurigiisa iska joogo haddii usan kari karin, in u ka qaybgalo dhaqdhaqaaqyada xannaanadda. Sannooyinka ugu horeeyaan ee carruurnimada caadi ahaan waxaa ilmaha ku dhaca infeekshanno badan.

NORRTÄLJE KOMMUN

Warbixin dheeraad ka aqriso 1177.1177 Vårdguiden

## Is-daryeelid – caddaynta dhakhtarka

Waxaa dhici karto in qof carruur ah u muddo gaaban ama dheer u baahan yahay daryeel ama in u daawooyin qaato markii u xannaanadda ku sugan yahay. Haddii ubadkaaga u baahida noocaas qabo, maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalidka waxaa muhim inaad arrinta kala xaajooto dugsiga arrinta ay khuseeyso, waayo maamullada dugsiyada siyaabo kala duwan ayay arrinta u maareeyaan, sida kuwa Dowladda hoose ay maamusho iyo kuwa madaxbannaan. Dugsiyada xannaanadda ee dowladda hoose maamusho waxay kaaga baahan yihiin caddayn dhakhtar oo lagu muujinayo baahida ubadkaaga u qabo daryeel iyo daawooyin markii u xannaanadda ku sugan yahay iyo warbixin xiriir la leh sida arrintaas loo qorsheeyay. Caddaynta noocaas ah waa in agaasimaha dugsiga gacanta laga saaro, waxayna gundhig u noqon doontaa sida daryeelkaas xannaanadda looga hirgelin doono.

Shaqaalaha daryeel-caafimaadeedka oo karti xirfadeed leh, ayaa ku dhaqaaqi doono qiimaynta talaabo ka qaadista is-daryeelka iyo in kale, sidaas awgeed qofka qiimayntaas ku dhaqaaqi doono adiga ma tihid. (is-daryeelid dugsiyada xannaanadda /iskuul, Dowladda hoose Norrtälje 2018)

## Sawir ka qaadis – filim ka qaadis

Dhammaan dugsiyada xannaanadda sida hadba waafaqsan Qorsheha waxbarshada ee dugsiyada xannaanadda, Lpfö-18, waa in xogwarran ka qoran horumarka iyo waxbarashada ilmaha, sidaas awgeed waxaa badi ahaan la adeegsada sawirro iyo filim. Qoraallada xog-waran waxaa mar kasta loogu dhaqaaqa iyadoo la isticmaalayo qalabyada dugsiyada xannaanadda, sidii loo ilaaliyo asturnaanta ilmaha, xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta iyo bareyaasha iyo xaq u yeelashada go`aan ka gaarida haddii, goorta iyo rabitaanka sawir ka qaadista iyo/ama filim ka qaadista. Sidaas darteed lama oggola in adiga oo ah xilhaayeha xannaanadda/waalidka aad ilmaha kale sawir ama filim ka qaado, ama siyaabo kale shaaciso aqoonsigooda adigoo sawir ama filim ka qaado goobaha magacyada ama sawirrada ilmaha lagu soo bandhigay. Nidaamkaan wuxuu ka hirgalay gudaha iyo barxadda goobaha xannaanadda. Sidoo kale waa mamnuuc sawir laga qaado shaashada madasha digitaalka ee maamulka dugsiga xannaanadda isticmaalo.

## Sirta - waajibka xajinta sirta xirfadda

Dhammaan shaqaalaha dugsiyada xannaanadda waxaa waajib ku ah in ay tixgeliyaan sirta xirfadda. Warbixinta aad bareyaasha kalsooni ku siiyo, waa ka

mamnuuc in ay u si gudbiyaan qof aan shaqo ku lahayn sida hadba waafaqsan sharciga dugsiyada. Sidaas darteed maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalididka ha ka walwalin in wixii xog ah ee ubadkaaga iyo qoyskiisa ku saabsan in la shaaciyo.

## Waajibka wargelinta – maamullada dugsiyada xannaanadda waxay la wada shaqeeyaan Maamullada adeegga bulshada.

Dhammaan dadka ka hawlgala dugsiyada xannaanadda ee dalka Iswiidan, waxaa khuseeya sharci, taasoo macneheedu ay tahay in bareyaasha ay waajib ku tahay in Maamulka adeegga bulshada ay wargeliyaan, haddii ay ka shakiyaan in qof ilmo ah usan xaalad fiican ugu sugnayn qoyskiisa, ama haddii cunugga u muujiyo in wax un ku dhaceen. Sababta waajibkaan loo hirgeliyay ayaa waxay tahay in Maamulka adeegga bulshada, u caawinno qoysaska ku sugan xaalado adag, sida in la siiyo taageero iyo caawinaad oo sare loogu qaado caafimaad wanaagga ilmaha. Wargelinta kaddib Maamulka adeegga bulshada ayaa la wareegayo mas`uuliyadda, wuxuuna baari doonaa nooca taageera iyo caawinaadda qoyska la siin doono sidii sare loogu qaado caafimaad wanaagga ilmaha.

## Caymis

Dhammaan ilmaha iyo dhallinyarada da`dooda u dhaxayso 0 - 19 sano oo ku nool kana diiwaan gashan degmada Norrtälje waxay wadar ahaan ka caymisan yihiin shilalka. Xitaa ilmaha aan ka diiwaan gashanayn degmada Norrtälje, laakin boosas ka haysto dugsiyada xannaanadda ee degmada sidaasoo kale ayay u caymisan yihiin. Caymiska wuxuu khuseeyaa dhammaan ilmaha dugsiyada xannaanadda ee dowladda maamusho iyo kuwa madaxbannaan.

## Dharka dugsiyada xannaanadda

Dhaqdhaqaaqyada dugsiyada xannaanadda badidooda waxaa lagu qabta goobaha dibadda ku yaalaan. Waa dhacdooyin sannadka oo idil oo ku salaysan ciyaar-carruureed iyo rabitaanka waxbarashada. Sidaas darteed waa in dharka ubadkaaga, ula qabsiisa jawga dibadda ee ciyaar-carruureed oona ay yihiin kuwa adkaysi badan, ciriir ku ahayn wax ku ool ah oo si fudud u labbisan karaan iskana saari karaan. Tan kale waa arrin muhim ah in ubadkaaga u dhar dheeraad xannaanadda u yaalaan, waayo ilmaha badi ahaan waxay u baahan yihiin in dharka laga beddelo. Waa in dharkiisa iyo qalabkiisa aad si qeexan u calaamadeeyso, taasoo bareyaasha, ilmaha iyo xilhaayeha xannaanadda/waalidka u si fudud u heli karo, waxaa sidaas looga hortaga in goob aan sax ahayn lagu kaydsho.

NORRTÄLJE KOMMUN

## Raashinka

Dowladda hoose Norrtälje waxay isticmaasha siyaasad iyo hab-maamuleed raashinka xiriir la leh, kuwaasoo dhammaan dugsiyada xannaanadda ee dowladda hoose maamusho ka hirgaleen. Aragtida fog waxaa weeyaan in ilmaha la siiyo cunto macaan oo nafaqo leh, kaasoo lagu kariyo agagaarka ilmaha kaalin ka geysta horumar waara. Dugsiyada xannaanadda ee madaxbannaan kuma qasbana in ay tixgeliyaan hab-maamuleeyadaas waxay isticmaali karaan kuwa iyaga u gaar ah. Cuntada laga cuno dhammaan dugsiyada xannaanadda ee Dowladda hoose maamusho iyo kuwa madaxbannaan waa lacag la`aan, waxaana laga hela raashin nooc kale ah haddii loo baahdo. Maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalididka waxaa xilliga gogoldhigga lagu siin doonaa fursad aad ku buuxiso foom, kaasoo nagu wargelin karto haddii ubadkaaga u baahan yahay raashin gaar ah oo ka duwan kan caadiga ah. Haddii ubadkaaga u ku xannuunsado haddii u cuno cuntada qaarkood, waa in qof dhakhtar ah caddayn laga keena.

## Xafaayadaha

Xafaayadaha dhammaan dugsiyada xannaanadda Dowladda hoose Norrtälje maamusho waa lacag la`aan waxaana dalbo maamullada dugsiyada xannaanadda ama förskoleområde.

## Wixii su`aallo ah ama aad ka fekerayso la xiriir

Hay'adda/qofka loo shaqeeyo/mas'uulka ah dugsiyada xannaanadda, waxaa sida hadba waafaqsan sharciga iskuullada waajib ku ah, in u leeyahay hab-raac laga qaabilo laguna baaro cabashada iyo in cabashada wax laga qabto. Hab-raaca waa in u yahay mid qoraal ah, tan kale qofka cabanayo waa in u garanayo in fursaddaas ay jirto. Haddii aad aragti ama aad ku talo jirto inaad ka cawdo dugsiga xannaanadda ee ubadkaaga boos laga siiyay, waa in aragtidadaada/caabashadaada toos u wargelisa maamulka dugsiga xannaanadda.

Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabta lagu siiyay ama sidii wax looga beddelay waxaad arrinta kala xiriiri kartaa agaasimaha dugsiga ama kaaliyeha agaasimaha dugsiga. Agaasimaha dugsiga iyo/ama kaaliyeha agaasimaha dugsiga wuxuu wadajir bareyaal ku dhaqaaqi doonaan baaritaan haddii loo baahan yahay in isbedello loo baahan yahay. Agaasimaha dugsiga waxaa xilsaaran in maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalidka ku wargeliyo go`aanka u arrinta ka gaaray.

NORRTÄLJE KOMMUN

Haddii dhacdadaas kaddib aad ku talo jirto inaad sii wado cabashada, waxaad u caban kartaa madaxa dhaqdhaqaaqyada dugsiyada xannaanadda ee dugsiyada xannaanadda ee dowladda hoose maamusho. Haddiise cabashada ay khuseeyso dugsiyada xannaanadda ee madaxbannaan, waxaad xaaladdaas la xiriiraysa madaxda hay'adda/qofka loo shaqeeyo/mas'uulka ah dugsiyada xannaanadda ee madaxbannaan. Madaxa dhaqdhaqaaqyada dugsiyada xannaanadda/ madaxda hay'adda/qofka loo shaqeeyo/mas'uulka ah dugsiyada xannaanadda ee madaxbannaan waxay qaabilayaan cabashada kaddib waxaa waajib ku ah in baaritaan ku dhaqaaqaan kaddib natiijada ku wargeliyaan. Barta internetka ee Dowladda hoose Norrtälje waxaad maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalididka ka aqrisan kartaa qaabka cabashada loo maareeyo waxaana ka caban kartaa isla goobtaas.